

# Ogaysiiska Hab-dhaqanka Asturnaanta

## Notice of Privacy Practices

Soomaali  
Somali



### Macluumaadkaaga Caafimaad

#### Your Health Information

Waqt walba oo aad booqatid isbitaal ama aad u tagtid dhakhtar ama bixiye kale oo daryeel caafimaad, macluumaadkaaga caafimaad ayaa la diiwaangaliyaa.

Taasina waxaa lagu magacaabaa diiwaankaaga caafimaadka. Waxaa lagu hayn karaa kumbiyutar ama gal fayl oo magacaagu ku qoran yahay. Xeerka u yaalla hay'ad walba oo ka mid ah xubnaha ururrada ayaa ah inay u ilaaliyaan diiwaankaaga caafimaad si badbaado leh.

### Asturnaanta iyo Macluumaadkagaa Caafimaad

#### Privacy and Your Health Information

Sharci ahaan, xogtaada caafimaad way asturanyihin. Mid kasta oo ka mid ah isbitaallada iyo ururrada kale ee ku qoran qoraalkan ayaa ah inay ku siiyan Ogeysiiska Hab-dhaqannada Asturnaanta.

Ogeysiiskan ayaa kuu sheegayaan sida macluumaadkaaga caafimaad loo isticmaali karo iyo cidda arki karta diiwaankaaga caafimaad. Boggan hore waa kaliya sookoob. Bogagga intaa ka dambeeyaa ayaa ku siinayaa faahfaahin dheeraad ah.

### Xuquuqdaada iyo Macluumaadkaaga Caafimaad

#### Your Rights and Your Health Information

Marka la eego sharciga federaalka, waxaad xaq u leedahay:

- Gow marka diiwaankaaga caafimaad la isticmaali doono ama lala wadaagi doono kuwa kale
- Weyddiiso nuqul ka mid ah diiwaankaaga caafimaad
- Weyddiiso in diiwaankaaga caafimaad loo diro bixiyeyaasha daryeel caafimaad ama dad kale
- Weyddiiso inaad xaddido isticmaalka iyo wadaagidda diiwaankaaga caafimaad
- Weyddiiso in la saxo diiwaankaaga caafimaad

- Weyddiiso liiska muujinta diiwaankaaga caafimaad ee la sameeyey ka dib 14kii Abriil, 2003 – haddii aan loo isticmaalin dawayn, lacag bixin ama hawlahu daryeelka caafimaad

### Wadaagidda Macluumaadkaaga Caafimaad

#### Sharing Your Health Information

Mid kasta oo ka mid ah isbitaallada iyo ururrada kale ee ku qoran qoraalkan ayaa dhici karta inay u baahdaan wadaagidda macluumaadkaaga caafimaad sababahan soo socda dhartood:

- Dawayntaada
- Lacag Bixinta
- Hawlgallada daryeelka caafimaadka sida xusuusinta ballanta, dib u eegista tayada daryeelka, iyo dheefaha iyo adeegyada la xiriira caafimaadka
- Hagayaasha Isbitaalka
- Hadduu sharcigu u baahanyahay

### Ilaalinta Asturnaanta Gaarka ah

#### Special Privacy Protection

Waxaa jira diiwaannada caafimaad qaarkood oo si gaar ah loo ilaaliyo. Oggolaanshaaga qoran ee in la wadaago noocyadan diiwaannada caafimaad ayaa la raadin doonaa ka hor inta aan lala wadaagin kuwo kale. Ilaalinta gaarka ah waxa ka mid noqon kara diiwaannada ku saabsan:

- Dawaynta caafimaadka dhimirka
- Natijjooyinka baaritaanka HIV
- Daaweynta Si Xun Ula Dhaqanka khamriga iyo doroogada
- Baaritaanka hidde-sidaha iyo natijjooyinka baaritaanka

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, fadlan tixraac waxyaabaha ku qoran Ogeysiiskan Hab-dhaqanka Asturnaanta Macluumaadka Caafimaadka.